

Istaraatijiyyadda iyo qorshaha heeganka covid-19 ee dawladda

Istaraatijiyyaddii iyo qorshihii heeganka ee maaraynta cudurka safmarka ah ee covid-19 ayay dawladdu cusboonaysiisay. Hadafka guud ee istaraatijiyyaddu waa in safmarka la xakameeyo. Mas'uuliyiinta heir qaran iyo kuwa heir deegaan waa in ay si dhow ula socdaan xaaladda oo ay tillaabo degdeg ah qaadaan haddii loo baahdo.

25-kii sibteembar markii waddanka dib loo furay, Norway waxay gashay maalin caadi ah oo heegan sare leh. Safmarku wuxuu noqday mid aan horey loo sii saadaalin karin oo nololmaalmeedka ayuu weli saamaynayaa. Waxay mar kale bulshadu wajahaysaa is-qaadsiintii cudurka oo badanaysa iyo adeegyadii caafimaadka- iyo daryeelka oo uu culaysku ku badan yahay. [Xaaladda ayaa hadda tilmaamaysa in tillaabooyinka xoogaa la adkeeyo, sidaas darteed ayayna dawladdu u soo rogoysaa tillaabooyin kale oo heir qaran ah.](#)

Istaraatijiyyaddu waxay ku salaysan tahay kuwii hore, laakiin waxaa lagu daray waxyaalo cusub oo muhiim ah. Hadafka guud ee istaraatijiyyaddu hadda waa in safmarka la xakameeyo, si uusan u horseedin in ay dad badan la xanuunsadaan oo uusan culaysku aad ugu badannin adeegga caafimaadka- iyo daryeelka. Waxaa islamarkaana loo baahan yahay in adeegyada dadweynaha si macquul ah loo helo, dhaqaalahana la ilaaliyo.

Safmarka ayaa xaaladda adeegyada caafimaadka- iyo daryeelka ka dhigaya mid nugul. Waa in laga hortagaa in ay hawluhu ku bataan isbataallada iyo adeegyada caafimaadka ee degmooyinka. Istaraatijiyyadda dawladda ayaa sidaas darteed waxay hoosta ka xarriiqaysaa xakamayn iyo in laamaha caafimaadka ee heir deegaan iyo kuwa heir qaran ba looga baahan yahay in ay tillaabooyinka degdeg u badin karaan ama u yarayn karaan ayaga oo eegaya hadba xaaladda markaas taagan.

Si taas loogu guulaysto waa in degmooyinka iyo hay'adaha kaleba ay lahaadaan heegan ilaa xad gaarsiisan, si ay u awoodaan in ay tillaabooyin degdeg u hirgeliyaan. Heeganku wuxuu muhiim u yahay sidii degdeg tillaabo loogu qaadi lahaa haddii taas loo baahdo si safmarka loo xakameeyo.

Tilmaamaha hagayaasha ah

Tilmaamaha hagayaasha ah ee lagu salaynayo qiimaynta khatarta iyo tillaabooyinka wax baa laga beddelay, waxayna ku cad yihiin istaraatijiyyadda. Lixda tilmaan-hage ee soo socda ayaa wax lagu salaynayaa marka la qiimaynayo tillaabooyinka:

- tirada dadka cusub ee isbataallada la dhigay iyo tirada bukaanka hal mar isbataalka wada yaal (tirada guud)
- tirada dadka ku jira qaybta daryeelka degdeggaa ah ee isbataallada
- da'da dadka isbataallada ku jira
- awoodda isbataallada
- awoodda adeegyada caafimaadka- iyo daryeelka ee degmooyinka
- tirada dadka tallaalka qaatay
- tirada dadka cudurka qaba

Waxaa caddaatay in cudurka safmarka ah ee covid-19 in uu yahay mid aan horey loo sii saadaalin karin, welina hubid-la'aan badan ayaa ka jirta sida uu fayrasku isu beddeli doono. Istaraatijiyyaddu waxay sharraxaysaa saddex siyaalood oo laga yaabo in safmarku isu beddelo.

- In dad yar isbataallada la dhigo, oo aysan faafidda cudurku bulshada dhib weyn ku noqon
- In dad intaas ka badan isbataallada la dhigo, oo ay faafidda cudurku ilaa xad bulshada dhib ku noqoto
- In dad badan isbataallada la dhigo, oo ay faafidda cudurku bulshada dhib aad u weyn ku noqoto

Kuwaas waxay ahaayeen siyaalaha laga yaabo in safmarku isu beddelo, lamana hubo in ay sidaas u dhici doonaan. Waxaa jira shan xaaladood oo saamayn kara is-beddellada safmarka. Heerka difaaca ee laga helayo tallaalka ama cudurka oo qofka ku dhaca, faafidda fayraska ee xilliga qabooobaha, noocyoo cusub oo fayraska ah oo is-beddel ku dhacay, dadweynaha iyo sida ay ugu hoggaansamaan talooyinka ka hortagga faafidda cudurka iyo infakshannada kale ee marinnada hawada.

Kormeer iyo heegan

Si loo xakameeyo waxaa muhiim ah in mas'uuliyiinta heer deegaan iyo kuwa heer qaran labaduba in ay xaaladda si dhow kormeer ugu hayaan, oo ay tillaaboojin soo rogaan haddii ay lagama maarmaan noqdaan. Waxay sidaas darteed dawladdu go'aamisay in heerka heeganka ee hadda jira la sii wado ilaa iyo dhammaadka bisha abriil ee 2022-ka.

Hawlaho tijaaba-qaadka, gooni u bixidda, raadraaca cudurka iyo karantiilka (TISK) ayaa ugu muhiimsanaa sidii safmarka loo xakamayn lahaa. Degmada iyo hay'adaha caafimaadku waa in ay leeyihiin heegan ay toddobaadkiiba tijaabada degdegga ah ugu qaybin karaan boqolkiiba 10 dadweynaha. Waxaa kale oo laga rabaa in ay leeyihiin heegan ay toddobaadkiiba ku tijaabin karaan boqolkiiba hal dadweynaha – oo ay awooddaas shan maalin gudahood ku kordhin karaan oo gaarsiin karaan in ay toddobaakiiba tijaabin karaan boqolkiiba shan dadweynaha.